**FAAFINTA** **RASMIGA**

الجريدة الرسمية

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية ارض بونت الصومال

**Sanadka 8-aad. Garowe 25. January. 2007** **Lam. 1**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدةالشهرية


***Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

# TUSMADA

## Qeybta Koowaad

**Sharci**

## Qeybta labaad

**Xeer**

**Waxba ma leh**

## Qeybta Saddexaad

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

***Sharci Lr. 5. ee 15/01/2007, kuna saabsa Faya dhowrka Baarista iyo [illegible] Agabka Beeraha Puntland..***

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIYA** | **PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Xafiiska Madaxweynaha** | **Office of the President**

**Sharci Lr.5 ee 22/12/2006, kuna saabsan Fayadhowrka Baarista iyo Karantiinka Agabka Beeraha Puntland.**

**Madaxweynuhu**

| | | |
|---|---|---|
| **Markuu arkay** | : | **Dastuurka DGPl qodobkiisa 54-aad faqradiisa 14-aad.** |
| **Markuu arkay** | : | **Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/162/2006 ee 15/11/2006.** |
| **Markuu Garowsaday** | : | **Ansixinta Sharcigan ee Golaha Wakiilada.** |

**Wuxuu soo saaray**

**Sharcigan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen sida kor ku cad qaanuunka faya dhowrka barista iyo karantiinka Agabka Beeraha ee Puntland

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan garyaqaanka guud iyo kan xog-hayaha Golaha Wakiilada.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu qaanuunkani faafinta rasmiga ah ee dawlada ku soo baxay.

**Wabilaati Towfiiq**

**Mud. Maxamuud Muuse Xiirsi**

Puntland State of Somalia
Office of the Vice President

**Agricultural Quarantine Inspection (AQI) (Baarista iyo Karatiinka Agabyada-beeraha)**

**Horudhac:**

Qaybta Baarista & Karantiinka cuntooyinka Beeraha & Dhirta (Agricultural Quarantine Inspection, A.Q.I), oo ugu muhiimsanaan jirtay Wasaaraddii Beeraha ee Maamuladii hore ee Soomaaliya, shaqadeeduna ahayd Baarista, Sugidda ka badqabka Cayayaanka iyo Cudurada Cuntooyinka Beeraha iyo Dhirta ee ka dhoofi jiray kana soo degi jiray garoomada iyo dekedaha ku yaala guud ahaan Soomaliya .

Si loo Dardargeliyo shaqada Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Beeraha iyo Deegaanku DGPL.

- Si looga hortago Cunada Isticmaalka Gabay, ee Xambaarsan Cayayaanada iyo Cudurada halista ah ee sida fudud looga soo dejiyo ama looga dhoofiyo Dekedaha iyo Garoomada Diyaaradaha Gobolada Puntland

- Si looga badbaaadiyo Bulshada Khatarta ay Xambaarsanyihiin cunooyinka Beeraha iyo dhirta.

- Si loo Dhawro Xiriirka aan la leenahay Wadamada Deriska nala ah (neighborhood) ama Xiriirka Ganacsi ee inoo dhaxeeyo (business relationship) isla markaasna aan ka badbaadno cayayaanka&Cudurada ay badeecooyinkaasi xambaarsanaan karaan.

Sidaas darteed, Mudaneyaal, Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Beeraha iyo Deegaanka DGPL waxay aasaastay Qaybta Baarista & Karantiinka Cuntooyinka beeraha & Dhirta (Agricultural Quarantine Inspection A.Q.I) iyada oo Xafiiskeedii ugu horeeyey ka furtay Dekedda Boosaso, isla markaasna ay u Qorshaysan tahay Wasaaradda in meel walba oo leh Xuduud, Deked iyo Garoon Diyaaradeed oo ka tirsan Gobolada Puntland laga furo Xafiikaas (agricultural Quarantine Inspection).

Qaybtaas oo Shaqadeeda aan kor ku xusanay, Waxa badeecadaha soo dega la imaandoonaan shahaadada (Pyto-sanitary certificate) badeecdaha dhoofana waxaa la siindoonaa shahaadada bedqabka ee (Pyto-sanitary certificate) ee Goboladan Puntland ka Dhoofayaa ama ka soo degaya, mid ka bed qaba cayayaanka & Dulinka khatarta ku ah deegaanka (Risk Pests).

**Shaqada qaybta:**

**<u>Wacyi gelin (Mobilization and awareness rising)</u>**

- Xafiisku wuxuu ku wacyi gelinayaa dhamaan ganacsatada waxsoo dejiya/dhoofiya in ay soo iibsadaan/ka ganacsadaan cuntooyin/badeecado bedqabkooda la hubiyey oo tayadoodu sareyso.
- Xafiisku wuxuu ku wacyiglinayaa kuna dhiiri gelinayaa ganacsatada in ay soo rartaan gaadiid ku wanaagsan xamuulka, isla markaasn uu keeni karo cudurro, Cayayaano iyo huur is bedel u keena badeecada la cuno haddii aanu lahayn marawaxado (ventilation)
- Xafiisku wuxuu ganacsatada ku wacyi gelinayaa iyo dhamaanba bulshada reer puntland dhibaatooyinka ay u keenaan Beeraha iyo Deegaanka Cudurada iyo cayayaanada soo raaca abuurada
- Xafiisku wuxuu ku tababarayaa buug iyo qoraalona siinayaa Ganacsatada habka wanaagsan ee rasaynta bakhaarada raashinka

**<u>1.0 Cuntooyinka Beeraha iyo Dhirta soo dega (Import of Plant and plant products)</u>**

1.1 In laga baaro Cuntooyinka Beeraha iyo Dhirta ee soo dega Cayayaanka iyo Cudurada Khatarta ah FAO 2000.

1.2 Cuntooyinka Beeraha iyo Dhirta soo dega in la baaro in ay Isticmaal gabeen iyo in la Dhalan rogay (genetically manipulate).

1.3 In Baarista Cuntooyinka heerkii laga rabay ee Qoyaanka Miraha Xabuublayda (percentage of grain moisture content).

1.4 In Cuntooyinka Beeraha iyo Dhirta soo degay ay wataan Warqad Caafimaadka ee bedqabka badeecadaha (phytosanitory certificate)

**<u>2. 0 Abuurada (Seed/Plant Part)</u>**

2. 1 In la tijaabiyo lana hubiyo tayada Biqalka Abuurada soo dega Gobolada Puntland.

2. 2 In tayada Biqilka Abuurada aysan ka hoosayn 80 % (Sideetan Boqolkiiba).

2. 3 In Abuurada ama Talaalada soo dega la sugo ka badqabka Cudurada iyo Cayayaanka (risk pest) loo Aqoonsaday Khatar..

2. 4 Abuurada iyo Talaalada ka hor imanaya ama aan waafaqsanayn

## 6.0 Baarista Nadaafada Gaadiidka Badda (Vessel sanitation inspection)

6.1 Xafiisku wuxuu ka hubınayaa gaadiidka wasakh, cayayaan, jiirar iyo dulin-beereed kale, sun iyo huur (humidity) oo keeni kara is-bedel (biological change) maadaama ay yihiin kuwo isaga goosha adduunka oo dhan.

6. 2 Gaadiidka lagu arko waxyaabaha qodobka kowaad ku cad waa la buufinayaa waxaana lagu buufinayaa cayayaanka lagu arko daawadiisa.

6.3 Xafiisku gaadiidlayda wuxuu ku wacyigelinayaa in ay kala ilaaliyaan cutooyinka iyo waxyaabaha khatarta abuuri kara sida (Sumaha, Shidaalka iyo Daawooyinka IWM).

6. 4 Marka la sugo gaadiidka waxaa la siinayaa warqada caddaynta nadaafada (Vessel Sanitation Certificate).

6.5 Waxaa reebban waxyaabaha daroogada ah (Maandooriyayaasha) in la soo dajiyo ama la dhoofiyo iyo daawooyinka qawaaninta caalamiga ah lagu mamnuucay.

**Liiska Cunnada la soo Dejiyo:**

1. Khudaarta (fruits,vegetables)
2. Qaadka (Jaadka)
3. Caleenta shaaha haylka qorfaha iyo filfisha
4. Tubaakada (tobacco) iyo sigaarka. badeeco iyo shiishiid
5. Sumaha Beeraha (pesticides, herbicides and fertilizers)
6. raashinka adag (Bur, Bariis, Qamadi Hruur Galey IWM)
7. rashinka Qasaacadaysan (Canned) (Jam, Mayonise, Saliida, Ketchup, Tomato souse, Cananaas, fasuuliyad, IWM)
8. Sharaabka (Bottled) Coke, Mirinda, 7up, Tufaax,)

**Liiska Cunnada la Dhoofiyo:**

1. Faleen (Maydi, Beeyo, Falaxfalax, Bakhuur IWM
2. Xabkaha (Malmal, Cadaad IWM)
3. Sisinta
4. Noocyada Liinta
5. Malabka